
# Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a (IDEA)


*Qaybta C Ilaalinta Nidaameed*

## XUQUUQAHAAGA BUKAAN AHAAN



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

**Qoysaska qaaliga ah,**



Kusoo dhawaada Barnaamijka Barbaarinta Caruurta Sabiga ah iyo Socod Baradka Washingon ee (ESIT)!

ESIT wuxuu u adeegaa caruurta ku haboon iyo qoysaska ama daryeel bixiyayaasha laga bilaabo dhalashada ilaa sanadka saddexaad ee canuga.

Barnaamijka ESIT waa wada shaqeyn ka dhaxaysa qoysaska, daryeel bixiyayaasha, Isku-duwaha Khayraadka Qoyska (FRC) iyo khubarada kale ee bixin doonaa taageerada si loo buuxiyo baahiyaha gaara u ah cunug kasta. Barnaamijkani wuxuu ku aadan yahay qoyska, isagoo xooga saaraya tababarida iyo siinta waalidka iyo daryeel bixiyayaashooda siyaasado lagu taageero koritaanka canugooda.

Waxaan xasuustaa markii koobaad ee gabadhayda yar bilowday helida adeegyada. Waxaanu sameynay qiimeyn iyo ogolaansho loogu talo galay Qorshaha Adeega Qoyska ee Gaarka ah (IFSP) isla maalintaasi. Waxaan xasuustaa ka tagitaanka balanta iyadoo madaxaygu isweydiinaayo waxa dhici doono, wuxuu nidaamku noqon doono, iyo waxay uga dhignaan doonto gabadhayda yar iyo horumarkeeda.

Dukumentigani wuxuu dajinayaa nidaamka la raaco si loo siiyo adeegyada ESIT caruurta Washington waana khayraad weyn ee waalidka iyo daryeel bixiyayaasha. Ujeedada nidaamka badbaadadu waa in la ogeysiiyo waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha xuquuqdooda sharciga iyo ilaalintooda. Kaydso dukumentigani oo dib u raac markaad su'aalo ka qabtid nidaamka ama xuquuqdaada waalid ama daryeel bixiye ahaan.

**Julie, Waalid**

## Tusmada Buugga

**HORDHAC** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .1

*Dib u eegis oo kooban oo Shakhsiyaadka leh Xeerka Waxbarashada Naafada (IDEA) iyo Taageerada Barbaarinta Caruurta Sabiga ah iyo Socod Baradka (ESIT) barnaamijka lagu daray Qeybta C ee IDEA.*

**HORDHACA NIDAAMKA ILAALADA** . . . . . . . . . . . . . . . . . 2

*Liiska xuquuqdaada waalid ama daryeel bixiye ahaan ee cunug heliya adeegyada.*

**OGEYSIIS QORAN OO HORE** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 3

*Sharaxaad shuruudaha in waalidiintu helaan ogeysiiska isbadaleda loosoo jeediyey Qorshaha Adeega Qoyska Gaarka ah ee cunuga ka hor intaan isbadeladan la sameyn.*

**OGOLAANSHAHA WAALIDKA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

*Hordhaca waxa ogolaanshaha waalidka macnihiisu yahay iyo waxa looga baahan yahay canuga helaaya adeegyada.*

**DIWAANADA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 5

*Sharaxaada xuquuqda cunugaaga ee asturnaanta iyo xuquuqaha waalid ahaan inaad heshid oo aad dib u eegtid diwaanada cunugaaga.*

**NIDAAMYADA XALINTA KHILAAFYADA** . . . . . . . . . . . . . .8

*Waxa la sameeyo marka aad khilaaftid adeega ama go'aanka.*

**DHEXDHAXAADIN** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 8

*Qaab lagula shaqeeyo qof dhexdhexaada oo taageeri kara xalinta dhibka ee kooxda canugaaga.*

**NIDAAMKA DACWAD DHAGEYSI DHEXDHEXAADA** . . . 9

*Nidaam caadiya oo uu sameeyey Sarkaal Dhageysi oo dhexdhexaada oo laga faa'idaysan karo marka qoysku rabo inuu dacwad gudbiyo.*

**MAAMULKA CABASHOOYINKA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 10

*Nidaam caadiya oo la sameyn karo hadii qoysku ka walaaco in shuruudaha barnaamijka aan la buuxin.*

**WAALIDIINTA U DHALA CARUURTA KUWA AAN DHALIN** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .11

*Wuxuu sharxayaa shakhsiga loo igman karo inuu matalo cunuga marka waalid ama masuul sharci oo kale aanu joogin iyo sida qofkaasi loo dooranaayo.*

**MACLUUMAADKA XIRIIRKA. . . . WARQADA DHABARKA**

*Sida loola xiriiro Hogaanka Kooxda Gobolka ESIT ee Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska.*




Washintong, Nidaamka Qaybta C waxa loogu yeedhaa barnaamijka caawimada hore ee caruurta yar-yar iyo kuwa raad qaadka ah (ESIT).

**Iskuxidhayaasha Khayraadka Qoyska (FRCs)**, lashaqaynta qoysaska, waxay soo jeedinkartaa agabka si ay u caawiyaan qoysaska inay fahmaan ilaalintooda nidaamka ku jira Qaybta C. sidoo kale waxay soo jeedinaysaa hababka adiga iyo xubnaha kale ee qoyskaagu aad u noqonkartaan shuraako aqoonleh si aad uga caawisaan buuxinta baahiyaha koritaan ee ilmahaaga.

## Hordhac

*Waa maxay Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah maxayna ka uga dhigan tahay cunugaaga?*

Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a (IDEA) waa sharci heer fadaraal ah kaas oo ay kujirto bixinta adeegyada caruurta hordhaca ee ku caruurta haboon iyo kuwa raad-qaadka (da'da dhalashada - 36 bilood) oo ay kujiran kuwa laxaadka la'a iyo qoysaskooda. Bixintan waxay ku hoos jiraan IDEA Qaybta C. Kuwan waxa qeexaya sharciyo heer fadaraal ah (34 CFR Part 303) iyo siyaasadaha iyo nidaamyada gobolka Washington.

Washintong, Nidaamka Qaybta C waxa loogu yeedhaa barnaamijka caawimada hore ee caruurta yar-yar iyo kuwa raad qaadka ah (ESIT). Nidaamka waxa loogu talgalay in kor loogu qaado kaqayb qaadashada qoyska oo uu hubiyo ujeedada waalidka talaabo kasta oo ah nidaamka faragalinta hore, oo kasoo bilaabanta tixraaca hore iyo sii wadida adeegyada keenista iyo iskubadalka.

Barnaamijka ESIT waxa kujira ilaalinta nidaamyada si loo ilaaliyo xuquuqaha waalidka iyo caruurta. Qoyska waa in la ogaysiiyaa ilaalinta nidaamyadan sida uu qeexayo xeerka fadaraalka 34 CFR 303.400-438, oo ay ku jiraan khiyaaraadka xalinta khilaafaadka xeer lambar 34 CFR 303.430-438, markaa waxay si firfircoon uga qayb qaadankaraan oo ay ku yeelankaraan door hogaan adeegyada lasiiyo caruurtooda iyo qoyskooda. Dhokumantigan xuquuqda waalidka waa ogaysiis sax ah oo ah nidaamka ilaalada ee caruurta iyo qoysaska sida uu qeexayo xeerarka fadaraalka Qaybta C.


Macluumaad dheeriya oo khuseeya nidaamka badbaadada canuga iyo qoysku waxa laga heli karaa Isku-duwaha Khayraadka Qoyskasta (FRC) iyo adeeg bixiyaha barbaarinta caruurta ee ka shaqeynaya bixinta adeegyada barbaarinta.

**"Adeegyada Caruurta Ku haboon"** waxa la go'aaamiyaa iyadoo loo marayo nidaamka IFSP. IFSP waa inay ku jirtaa bayaan gaar ah oo ku saabsan adeegyada daruurig ah ee ku saabsan carurta soo loo buuxiyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha iyo qoyska si loo gaadho maxsuul ay aqoonsatay IFSP. Xeerarka fadaraalka Qaybta C **www.gpo.gov/fdsys/pkg/FR-2011-09-28/pdf/2011-22783.pdf** qayaxaysaa adeegyada caruurta sida adeega kaasoo " loo nashqadeeyay si loo buuxiyo baahiyaha koritaan ee ilma kasta oo ku haboon Qaybta C iyo baahiyaha qoyska ee la xidhiidha kor u qaadista koritaanka ilmaha."

**Macluumaadka shakhsiyan la aqoonsan karo waxa ku jira:**

1. Magaca canuga, magacaaga, ama magacyada xubnaha kale ee qoyska.
2. Ciwaanka cunugaaga ama qoyskaaga.
3. Aqoonsadayaasha shakhsiga sida cunugaaga ama lambarkaaga adeegyada bulshada.
4. Aqoonsadayaasha kale ee aan tooska ahayn, sida taariikhda dhalashada cunugaaga, goobta dhalashada, iyo magaca hooyadii.
5. Liiska astaamaha shakhsiga ama macluumaadka kale ee suuro galin kara in loo aqoonsado cunugaaga si cad.
6. Macluumaadka uu codsaday qof barnaamijka barbaarintu aamisan yahay inuu garanaayo aqoonsiga cunugaaga.

## Hordhaca Nidaamka Ilaalada



Ujeedada dhokumantigan, Waalid micnahiisu waxa weeyi waalidka dhalay ilmaha, waalidka korsaday, ilaalada sharciga ah, waalidka korsadaha ah ama shaqsiyaadka matalaya goobta dhalashada ama waalidka korsaday kuwaas oo ilmuhu lanoolyahay.

### *Waa maxay xuquuqahaaga ahaan waalidka canuga helaaya adeegyada ESIT?*

Barnaamijka ESIT ee Washington, adigu, waalid ahaan, waxaad leedahay xuquuqahan soo socda:

- Xuquuqda ah qiimaynta habdhaqano badan iyo qiimaynta oo la raacayo horumarinta Qorshaha Adeega Shaqsiyaadka Qoyska (IFSP) kulanta koowaad ee IFSP, 45 cisho oo ku xusan tixraaca kalaandarka. Habdhaqanada badan micnaheedu waxa weeyi kutaxaluqnaanta laba iyo wax kabadan oo habdhaqan ama gaarka ah. Tusaale, Khabiir ku hadalka luuqada ah iyo Macalin Gaara.
- Xuquuqda helitaanka u qalmitaanka, Qiimaynta, horumarinta IFSP, adeega isku xidhka, iyo ilaalinta nidaamka aan wax kharash ah ku joogin qoysaska.
- Xaqa ay u leeyihin in ay helaan qiimayn, hadii aad codsato oo aad siiso ogolaansho arinkaas, wakhti kasta inta lagu gudo jiro nidaamka kala xulista (hadii la isticmaalay).
- Hadii ay ku haboontahay Qaybta C, xuquuqda helitaan **Adeegyada isdhexgalka ee hore ee ku haboon** ilmahaaga iyo qoyska sida ay sheegayso IFSP.
- Xuquuqda diidmada kala xulista, dib u eegista, qiimaynta, iyo adeegyada.
- Xuquuqda lagugu casuumay si aad uga qayb qaadato dhamaan kulanada larajaynayo in lagu sameeyo go'aan iyadoo la tixgalinayo aqoonsiga badalida soo jeedinta, qiimaynta, ama meelaynta ilmahaaga, ama siinta adeegyada caruurta ee ku haboon ilmahaaga ama qoyska.
- Xuquuqda inaad hesho ogaysiis qoran oo mudaysan kahor intaan waxkabadalka lasoo jeedin ama ladiidin aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta ilmahaaga, ama siinta adeegyada faragalinta hore ee ilmahaaga ama qoyska.
- Xaqa inaad hesho adeeg kasta oo adeegyada caruurta ah ee deegaanka dabiiciga ah ilaa iyo inta ku haboon si loo buuxiyo baahiyaha koritaan ee ilmahaaga.
- Xuquuqda ilaalinta kalsoonidaf **xogta la aqoonsankaro ee shaqsiyadeed**.
- Xuquuqda helitaanka nuqulka hore ee diwaanka daryeelka caruurta ee ilmahaaga oo bilaa kharash ah.
- Xuquuqda inaad koobiyaysankarto dib u eegis kasta, qiimayn kasta, oo IFSP ah waa inlagu siiyaa adiga marka ay macquulka tahay kadib kulan kasta oo IFSP ah.
- Xuquuqda baadhista iyo dib u eegista, hadii ay ku haboontahay, waxkabadalka diwaanka ilmahaaga.
- Xuquuqda aad ku codsankarto dhex dhexaadin/ama dhex dhexaadnimo iyadoo la eegayo dhagaysiga si loo dib loogu xaliyo waalidka/isku raacsanaan la'aanta waalidka. Xuquuqda inaad gudbisato cabasho maamul.

Intaas waxa dheer xuquuqaha kor ku xusan, waxaan ku magaacabantahay inlagu ogaysiiyo ilaalinta nidaamyada gaarka ah ee ku xusan Qaybta C. Xuquuqahan hoos ku xusan.

## Ka hor Ogaysiiska Qoraalka ah

*Sidee ayuu adeeg bixiyaha ESIT ee cunugaagu kuu soo ogeysiin doonaa kulamada iyo isbadelada adeega?*

Ka hor ogaysiiska qoraalka ah waa in lagu siiyaa adiga iyadoo lagu salaynayo wakhti suurogal ah ka hor bixiyaha adeega caruurta uuna soo jeedin ama diidin inuu bilaabo ama waxkabadalo aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta ilmahaaga, ama siinta adeega caruurta ee ilmahaaga iyo qoyskaaga. Ogaysiiska waa in si faah faahsan oo ku filan lagugu wargaliyaa adiga:

- Talaabada uu soo jeediyay ama uu diiday qandaraaslaha adeega faragalinta hore ama bixiyaha adeega hore ee faragalinta.
- Sababaha loo qaadayo talaabada.
- Dhamaan ilaalinta nidaamyada laga heli karo Qaybta C.
- Xaalada Dhex dhexaadinta, xaalada cabashada, iyo wakhtiga kama dambaysta ah ee nimaadyada dhagaysiga, oo ay ku jirto sharaxaaada sida aad u xaraysan karto cabasho iyo waxtiga nidaamyadan.

Ogaysiiska waa in lagu qoraa luuqad lafahmi karo dadwaynuhu si guud oo lagugu siiyaa luuqadaada dhaladka ah, hadii kale si cad looma gaadhayo waxa laqabanayo.

Hadii luuqadada dhaladka ama nidaamyo kale oo wada xidhiidh aanay ahayn luuqad qoran, bixiyaha adeega faragalinta hore waa inuu qaadaa talaabooyinkan si uu u hubiyo:


- In ogaysiiska loo turjumay si hadal ah ama nidaamyo kale oo luuqadada dhaladka ah ama nidaamyo kale oo wada xidhiidh;
- Waxaad fahantahay ogaysiiska; oo
- Waxa jira cadayn qoraal ah taasoo shuruudaha lagu qeexay nidaamyada lala kulmay.

Ogolaanshahaaga qoraalka ah waa in la helaa ka hor:

- Maamulida Kalasaarida horumarineed si loo go'aamiyo in ilmahaaga looga shakiyay in uu leeyahay laxaad li'i.
- Gudbinta dhamaan dib u eegisaha iyo qiimaynta ilmahaaga.
- Siinta adeegyada caruurta ee ilmahaaga.
- Isticmaalka kabka dadwaynaha ama caymiska ama caymiska gaarka loo leeyahay si loo bixiyo adeegyada.
- Wadaagista macluumaadka shaqsiyaadka la aqoonsankaro ee kugu saabsan adiga.

Ogolaanshaaaga qoraalka ah waa in sidoo kale la helaa ka hor adeegyada hore caruurta aan lagu siinin.

Hadii aanad siin wax ogolaansho ah, lama qaadi doono wax talaabo ah si laguu qasbo (kalifo) adiga. Dhinaca kale markan ka eegno, FRC, ama bixiyaha adeega caruurta ma isticmaali karo iyadoo ay ugu wacantahay nidaamyada dhagaysiga si uu u carqaladeeyo diidmadada si loo bixiyo ogolaansho.



**Luuqada dhaladka,** halkaas loo isticmaalo inlagu qeexo luuqada Ingiriisiga, taas macnaheedu waxa weeyi luuqada aad sida caadiga ah aduu isticmaasho. Marka aad samaynayso dib u eegista iyo qiimaynta ilmahaaga, luuqa dhaladka micnaheedu waxa weeyi luuqada aad badanka u isticmaasho ilmahaaga. Markaad isticmaasho adigoo xushmaynaya qofka kaas oo dhaga la'a ama maqalku ku adagyahay, indha la'a ama araga waxkaqaba, ama qof aan waxba qori karin, luuqada dhaladka micnaheedu waxa weeyi hab wada xidhiidh taasoo badanka uu qofkaasi isticmaalo (sida luuqada calaamadinta ookale, Nidaamka dadka dhagoolayasha, ama wada xidhiidh afka ah.)



## Ogolaanshaha Waalidka

*Waa maxay ogolaanshaha waalidka oo sidee ayaad u sameyn kartaa xuquuqda ogolaanshaha?*

Ogolaanshaha micanahiisu waxa weeyi:

- Waxa si buuxda laguugu wargaliyay dhamaan macluumaadka la xidhiidha shaqada taas oo ogolaanshaha eegaysa, ee luuqadada dhaladka.
- Waxaad fahantay oo aad ku raacday hab qoraal ah si aad u fuliso shaqooyinka ogolaanshahaaga ku dhisan, iyo ogolaanshaha qeexaya shaqooyinka iyo liiska diwaanka daryeelka caruurta (hadii) kaasoo lasii dayn doono iyo qofka.
- Waxad fahantay ogolaanshaha damaanada ay tahay tadaruc qaybtaada oo laqaadi karo xili kasta.

Hadii ogolaanshahaaga meesha laga saaro, maaha wax dib looga shaqaysinkaro (kuma haboona talaabo dhacday kahor ogolaanshaha intaan meesha laga saarin).

Bixiyaha adeega caruurta ama shaqaalaha ku haboon ee aqoonta u leh waa inay sameeyaan dadaal macquul ah si loo hubiyo inaad:

- Si buuxda uga warqabto habka kala xulista, dib u eegsita iyo qiimaynta ama adeega laguu heli karo.
- Fahantid in ilmahaagu aanu awoo u yeelandoonin in uu helo kala xulista, dib u eegista iyo qiimaynta ama adeegyada ilaa iyo ogolaansho lasiiyo.

Sida ku haboon waalidka ilmaha ee Qaybta C, waxaad go'aamin kartaa in ilmahaaga ama xubnaha kale ee qoysku ay aqbali doonaan ama diidi karaan adeega(yada) hore ee daryeelka caruurta kujirta barnaamijkan. Waxaad sidoo kale diidi kartaa sida adeegyada (marka laga reebo shaqooyinka maamul ee ku jira shuruudaha isku xidhka khayraadka qoyska) ka dib aqbalaada kowaad adiga oo aan meesha kasaarayn adeegyada kale ee caruurta ee kujira Barnaamijka ESIT.

## Diwaanada

### *Xuquuqdee ayey waalidiintu heli karaan oo dib uga eegi karaan diwaanada caruurtooda?*

**Sirhaynta**

Marka loo eego sirhaynta macluumaadka nidaamyada ku xusan dhokumantigan, waa in lagu siiyaa fursad si loo baadho oo dib loogu eego diwaan kasta oo la xidhiidha kala xulista, dib u eegista iyo qiimaynta, go'aaminta ku haboonanshaha, horumarinta iyo hirgalilnta IFSPs, siinta adeegyada caruurta, cabashooyinka shaqsiga ah ee khuseeya ilmahaaga, iyo qaybta kale ee barnaamijka C ee ku taxaluqa waxyaabaha ku saabsan ilmahaaga iyo qoyskaaga.

Bixiye kasta oo adeega faragalinta hore waa inuu ku siiyaa fursad inaad ku baadho oo dib u eegis ku samayso (inta lagu gudo jiro saacadaha shaqada) diwaankasta oo la xidhiidha ilmahaaga ama qoyskaaga kuwaasoo lasoo ururiyay, la ilaaliyay ama uu isticmaalay qandaraasle ama bixiye ku jira Qaybta C laga soo bilaabo wakhtiga magacaabista marka ilmahaaga loo ogoladay adeegyada caruurta ilaa iyo markii dambe marka ka wakaalada ka qayb qaadashadu aanay u baahnayn inay ilaaliso macluumaadka ku haboon xeerarka heer fadaraal iyo gobolba. Bixiyaha adeega caruurtu waa inu u hogaansamaa codsiga oo aanu lascon dib udhigis aan daruuri ahayni iyo kahor kulan kasta oo loo tixgalinayo IFSP ama dhagaysi la xidhiidha aqoonsi, qiimayn, meelayn, ama siinta adeegyada ilmahaaga iyo qoyskaaga iyo, kiis aan ka badnayn 10 cisho kadib marka codsiga la sameeyo. Fursada in la baadho oo dib loo eego diwaanada daryeelka caruurta oo ay kujirto:

- Xuquuqda inaad ka jawaabto codsiyada suurogalka ah ee ka imanaya bixiyaha daryeelka caruurta ee sharaxaadaha iyo turjumaada diwaanada.
- Xuquuqda inaad codsato bixiyaha adeega daryeelka caruurta inuu kusiiyo diwaan kakooban macluumaad, hadi uu ku guuldaraysto koobiyada wuxuu si wax ku ool ah kaaga hortagaya inaad fursad u hesho baadhis iyo dib u eegis aad ku samayso diwaanka.
- Xuquuqda uu leeyahay qof kaasoo ku matalaya adiga si uu u baadho dibna ugu eego diwaanka.

Bixiyaha adeega caruurtu wuxuu saadalin karaa inaad awood uleedahay inaad baadho oo aad dib u eegto diwaanada laxidhiidha ilmahaaga hadii kale oo aanu qandaraaslaha ama bixiyuhu kusiin dhokumantiyo kuwaasoo sheegaya inaanad awood ulahayn oo kujira sharciga gobolka sida xuquuq sharci, daryeel korsasho, ilaalin, kala tagid, iyo furiin.

Bixiye kasta oo daryeelka caruurta ahi waa inuu ilaaliyaa diwaanka qoraalka ee dhinacyada helitaanka galitaan diwaanada lasoo ururiyay, lahelay ama la isticmaalay ee kujira Qaybta C (marka laga reebo galitaanka waalidka iyo shaqaalaha loo ogolaaday sida bixiyaha iyo qandaraaslaha), oo ay ku jiraan magaca qaybta, taariikhda galitaanka lasiiyay, iyo ujeedada loogu ogolaaday qaybta in uu isticmaalo diwaanka ilmaha.

Hadii diwaan kasta oo daryeelka caruurta ah oo ay kujiraan macluumaadka wax ka badan hal cunug, waad baadhi kartaa oo aad dib u eegi kartaa hadii macluumaadku kaliya la xidhiidho ilmahaaga, ama adiga, ama la ogaysiiyo macluumaad gaar ah.

**qayaxitaanada soo socda ayaa lagu isticmaalay qeybtan:**

1. "**Burburinta**" macneheedu waa burburinta muuqaalka ama ka saarida meesha aqoonsiga macluumaadka si loo hubiyo in aan shakhsiyan gabi ahaanba loo aqoonsan karin.
2. "**Diwaanada barbaarinta,**" "**Diwaanka(nada) barbaarinta**" ama "diwaanka(nada)" macnahoodu waa diwaanada khuseeya cunuga ee loogu baahan yahay in lagu ururiyo, kaydiyo ama isticmaalo Qeybta C; iyo
3. "**Wakaalada ka qeybgalaysa**" macneheedu waa shakhsi, wakaalad, haayada ama urur kastoo urursada, haysta, ama isticmaala macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga si loo hirgaliyo shuruudaha Qeybta C. Wakaalada ka qeybgalaysa waxa ka mida wakaaladaha gobolka, adeeg bixiye barbaarineed oo bixiya adeegyada Qeybta C (oo ay ku jiraan isku-duwida adeegyada, baadhitaanada iyo qiimeynaha iyo adeegyada kale ee Qeybta C). Kuma jiraan khayraadka ilaha gudbinta koobaad ama waakalada dawlada ama gaarka ah ee maalgaliya adeegyada caruurta.

## Diwaanada

Midkasta oo ka mid ah bixiyaha adeega caruurta waa inuu ku siiyaa, iyadoo ku dhisan codsi, liiska noocyada iyo meelaha lagu ururiyo diwaanada faragalinta hore, lagu ilaaliyo, ama uu isticmaalay bixiye ama qandaraasle. Bixiyaha adeega adeegyada caruurta wuxuu kaa qaadi karaa lacag koobiyaynta diwaanada kuwaasoo laguu sameeyay adiga sida ku xusan Qaybta C hadii lacagtu aanay si caadi ah uga hortagayn inay kaa joojiso fursada inaad baadho oo aad dib u eegto diwaanadan. Si kastaba ha ahaatee, kaama qaadayan wax lacag ah si ay kuugu baadhaan ama dib kuugu soo celiyaan macluumaad ku jira Qaybta C. intaa waxa dheer, waa in sidoo kale lagu siiyaa koobiga qiimayn kasta iyadoon wax lacag ah lagaa qaadayn, qiimaynta ilmaha, qiimaynta qoyska, iyo IFSP sida ay macquulka ku tahay ka dib shirkasta oo IFSP ah.

Hadii aad aaminsan tahay in macluumaadka ku jira kaydka adeegyada la ururiyey, ilaaliyey, ama ku jira Qeybta C waa qalad ama marin habaabin, ama wuxuu ka hor imanayaa siyaasada ama xuquuqda adiga ama cunugaagu leeyahay, waxaad codsan kartaa in adeeg bixiye adeegyada caruurta oo ilaaliya macluumaadka si wax looga badelo macluumaadka.

- Qandaraaslahane ama bixiyahane waa inuu go'aamiyaa in wax laga badelo macluumaadka iyadoo la raacayo codsiga mudada macquulka ah ka dib marka la helo codsiga.
- Hadii qandaraaslahane ama bixiyahan diido inuu wax uga badelo macluumaadka sida aad codsatay, waa in lagusoo ogeysiiyaa diidmada lagugulana taliyaa xuquuqda dhageysiga.



Adeeg bixiyaha adeegyada caruurtu waa inuu, codsi ahaan, bixiyaa fursada dhageysiga si uu u joojiyo macluumaadka kaydka adeegyada caruurta si uu u hubiyo inaanu ahayn khalad, marin habaabin, ama hadii kale aanu ka hor imanayn siyaasada iyo xuquuqdaada adiga iyo cunugaaga. Waxaad codsan kartaa nidaamka dhageysiga ee Qeybta C ama nidaamyada dhageysiga ee waafaqsan Xeerka Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (FERPA) shuruucda 34 CFR 99.22.

- Hadii, natiijo ka dhalatay dhageysiga awgii, qandaraas leh ama bixiye adeeg go'aamiyo in macluumaadku aanu sax ahayn, marin habaabin yahay, ama hadii kale ka hor imanaayo asturnaanta ama xuquuqdaada kale ee adiga iyo cunugaaga, waa in la badelaa macluumaadka sidaasi oo lagugusoo ogeysiiyaa qoraal.
- Hadii, natiijo ka dhalatay dhageysiga awgii, qandaraas leh ama bixiye adeeg go'aamiyo in macluumaadku aanu sax ahayn, marin habaabin yahay, ama hadii kale ka hor imanaayo asturnaanta ama xuquuqdaada kale ee adiga iyo cunugaaga, waa in lagusoo ogeysiiyaa xuquuqdaada si aad ugu dartid kaydka cunugaaga, bayaan ka faaloonaya macluumaadka, iyo dajinta sababkasta oo lagu diiday go'aanka qandaraaslaha ama adeeg bixiyaha.
- Sharaxaad kastoo lagu daro kaydka cunugaaga ee nidaamyadan waa inuu ilaaliyaa adeeg bixiyaha adeegyada caruurta ka qeyb ahaan kaydka cunugaaga ilaa iyo inta kaydka ama qeybta la diiday (qeybta kaydka aad ka hortimiday) uu ilaaliyaa qandaraas leh ama adeeg bixiye.
- Hadii kaydadka cunugaaga ama qeyb la diiday uu u sheego qandaraas leh ama adeeg bixiye cid uun, sharaxaadaada waa in sidoo kale loo raaciyaa cidaasi.

**Ogolaanshaha Ka Hor Sharaxaada**

Ogolaanshaha waalidka waa in la helaa ka hor intaan macluumaadka shakhsiga ee la aqoonsano karo:

- Loo sheegin qof aan ka ahayn masuuliyiinta qandaraaska ama adeeg bixiye ururinaya, ilaalinaya, ama ku isticmaalaya Qeybta C, ilaa iyo ogolaansho laga helo Qeybta C (34 CFR 303.414) iyo FERPA (34 CFR 99.31); ama
- Loo isticmaalo ujeedo aan ka ahayn buuxinta shuruuda Qeybta C.

## Diwaanada

Macluumaadka kaydka adeegyada cunugaaga ma siin karo adeeg bixiye adeegyada caruurta haaydaha kale adigoon fasax siin ilaa iyo qandaraaslaha ama adeeg bixiyaha loo ogalaado inuu sidaasi sameeyo marka loo eego FERPA. Hadii aad diido inaad bixisid ogolaansho, adeeg bixiyaha adeegyada caruurtu wuxuu hirgalinayaa nidaamyada la xiriira diidmada, sida inuu kuu sharxo sida in aanad bixin ogolaansho u saameynayso awooda cunugaagu inuu helo adeegyada caruurta, ilaa iyo inta nidaamyadu aanay joojinayn xuquuqdaada inaad diido ogolaanshaha.

Qeybta C, ESIT ayaa loo baahan yahay si loo sii daayo magaca cunugaaga iyo taariikhda dhalashada, iyo macluumaadkaaga xiriirka (ooy ku jiraan magacaaga, ciwaanka, lambarka tilifoonka) adoon u ogolaan wakaalada waxbarashada gobolka (Xafiiska Kormeeraha Tilmaamta Dadweynaha) iyo wakaalada waxbarashada deegaanka (dugsiga degmada) halka cunugaagau degan yahay. Macluumaadkani waxa loogu baahan yahay in lagu aqoonsado dhamaan caruurta ku haboon adeegyada Qeybta B ee IDEA.

Badbaadooyinka soo socda waa in la diyaariyaa si loo hubiyo asturnaanta kaydka:

- Adeeg kasta oo ah daryeelka caruurta waa inuu ilaaliyo sirhaynta macluumaadka shaqsi ee la aqoonsankaro ee lasoo ururiyay, ilaalinta, kaydinta, lifaaqa, iyo heerarka bur burinta.
- Hal sarkaal oo adeeg bixiyaha adeegyada caruurta ayaa masuul ka ah hubinta asturnaanta macluumaadkasta oo shakhsiga lagu aqoonsan karo.
- Dhamaan shakhsiyaadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo waa inay helaan tababar ama tilmaam khuseysa Siyaasadaha iyo nidaamyada Qeybta C ee Washington kuwaasoo waafaqsan IDEA iyo FERPA.
- Adeega bixiyaha adeegyada caruurtu waa inuu ilaaliyaa, baadhitaanka dadweynaha awgii, liiska imika ee magacyada iyo boosaska dhamaan shaqaalaha wakaalada ee heli kara macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo.
- Adeeg bixiyaha adeegyada caruurtu waa inuu ogeysiiyaa waalidka marka macluumaadka shakhsiga ee la aqoonsan karo ee la ururiyey, ilaaliyey, ama la isticmaalay aan gabi ahaanba loo baahneyn si loo siiyo adeegyo cunugaaga ama qoyskaaga Qeybta Part C, qawaaniinta GEPA ee 20 USC 1232f, iyo EDGAR, 34 CFR qeybaha 76 iyo 80.
- Marka macluumaadka aan loogu baahneyn siinta adeega cunuga ama qoyska, macluumaadka waa in lagu burburiyaa codsiga waalidiinta.

Kaydka rasmiga ah ee magaca cunugaaga, taariikhda dhalashada, macluumaadka xiriirka waalidka (ooy ku jiraan ciwaanka iyo lambarka tilifoonka), magacyada iskuduwaha(yaasha) adeegya (FRCs), iyo bixiyha(yaasha) adeegyada caruurta, oo ay ka baxaan xogta (ooy ku jiraan sanadka iyo da'da marka la baxaayo, iyo barnaamijyada lagu galay ka bixitaanka) waxa la ilaalin karaa iyadoo xanibaado wakhti jirin.

Adeeg bixiyaha barbaarintu waa inuu ilaaliyaa asturnaanta macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo mana bixin karo diwaanada cunuga iyadoo waalid ogaleyn.

## Nidaamyada Xalinta Khilaafyada

*Maxaad sameyn karta hadii aad walaac ka qabtid barnaamijka barbaarinta canugaama adeegyada la bixiyey?*

Hadii aad ka walaacsan tahay barnaamijka adeega cunugaaga, fadlan la wadaag FRC ama kooxda IFSP sida ugu macquulsan. Barnaamijka ESIT wuxuu dhiirigalinayaa xalinta khilaafyada sida ugu fiican. Haseyeeshee, hadii walaac aan si rasmiya loo xalin karin, doorashooyinka xalinta khilaafaadka ayaa diyaara.

Hadii aad ku khilaaftid adeeg bixiyaha adeegyada caruurta aqoonsiga, qiimeynta, meelaynta cunugaaga, ama qawaaniinta adeegyada caruurta ee haboon ee cunugaaga ama qoyskaaga, waxaad codsan kartaa xalin khilaaf oo ku haboon walaacyadaada.

**Kuwan soo socdaa waa saddex nidaam oo kuu diyaara inaad ku xalisid khilaafka. Waxa kuwan ku jira dhexdhexaadin, nidaam dacwo dhageysi cadaalada iyo cabashooyinka maamulka. Waxa loo sameyn karaa si kasta.**



## Dhexdhexaadinta

*Dhexdhexaadintu waxay fursad kuu siinaysaa inaad ku xalisid khilaafka hab aan mucaarid lahayn. Waa mutadawacnimo waana in si xor ah ay iskugu raacaan labada dhinacba.*

Wakaalada gobolku waxay dajin kartaa nidaamyo si ay u siiso waalidiinta iyo bixiyayaasha adeegyada caruurta ee doorta inaanay u isticmaalin nidaamka dhexdhexaadinta fursad ay ku kulmaan, wakhtiga iyo goobta kugu haboon, cid aan daneynayn (dhexdhexaadiye aan dhana u janjeedhin), oo heshiis kula jira haayad xalin khilaafeed, ama xarunta tababarka iyo macuulaadka waalidiinta ama xarunta khayraadka bulshada ee Gobolka, si uu u sharxo faa'idooyinka, una dhiiri galiyo isticmaalka, nidaamka dhexdhexaadinta.

Dhex dhexaadintu waa inay ku dhamataa wakhti mudaysan ee risiidhada soo socda oo ay wado wakaalada hogaanka gobolka taasoo ka codsanaysa dhex dhexaadin oo loomana isticmaali karo in la dafiro ama dib loo dhigo xuquuqahaaga dhexdhexaadnimo iyadoo ay ugu wacantahay wakhtiga kama dambaysta ah ee dhagaysiga ama dafiraada midna xuquuqaha uu ku siiyay Qaybta C.

Dhex dhexaadinta waxa la mudayn doonaa iyadoo wakhti lagu salaynayo oo loo haynayo goob u wanaagsan labada dhinacba. Dhex dhexaadiye dhex ah oo aqoonleh, kaasoo ku tababaran dhex dhexaadin wanaagsan, ayaa la kulmi doona labada dhinacba si uu uga caawiyo in xal loo helo khilaafaadka si aan caadi ahayn, deegaan aan layska soo horjeedin.

**Dhexdhexaadin** waxay fursad kuu siinaysaa inaad ku xalisid khilaafka hab aan mucaarid lahayn. Waa mutadawacnimo waana in si xor ah ay iskugu raacaan labada dhinacba.

Wakaalada hogaanka ee gobolka waxay ilaalinaysaa liiska dhexdhexaadiyaasha dhexda ah kuwaasoo aqoonta u leh sharciga iyo shuruudaha la xidhiidha bixinta adeega caruurta yar-yar iyo kuwo raad-qaadka ah ee naafada ah iyo qoysaskooda. Dhex dhexaadiyaasha waa in loo doortaa hab aan kala doorasho lahayn, wareeg ah, ama dhex dhexaadinta kale. Wakaalada hogaanka ee gobolku waxay masuul ka tahay kharashka dhex dhexaadinta oo ay ku jirto kharashaadka kulamada si loo dhiirigaliyo dhex dhexaadinta.

Hadii isku raacsanaan la'aanta lagu xaliyo dhex dhexaadin, dhinacyadu waa inay dhamaystiraan heshiishka sharciga ah ee isku xidhka kaasoo qeexaya xalinta oo sheegaya dhamaan falanqaynta taasoo dhacday intii lagu gudo jiray nidaamka dhex dhexaadinta waa inay noqotaa mid sireed oo aan loo isticmaalin cadayn la xidhiidha nidaamka dhagaysiga ama talaabo dacwadeed. Heshiiska waa inaad adigu saxeexdo iyo qofka matalaya wakaalda hogaanka ee gobolka kaas oo awood u leh isku xidhka wakaalada. Qoraalka, saxeexida heshiishka dhex dhexaadinta waa mid ay hirgalinayso maxkamadaha gobol kasta ee garsoorka ama maxkamada degmada ee Maraykanka.

Dhex dhexaadintu kaama xanibayso adiga inaad codsato nidaamka dhagaysiga dhex dhexaadnimo ee xili walba. Waxaad si wada socota u xaraysankartaa codsi dhex dhexaadnimo iyo dhagaysi cadaalad ah sida ku uu qeexay bogan soo socda.

## Nidaam dhagaysi dhex dhexaad ah

*Nidaamka dhagaysiga dhex dhexaadnimada waa nidaam caadi ah oo ay samaysay sarkaal dhex dhexaad ah oo waana doorasho qoysaska doonaya inay xaraystaan dacwad shaqsi ah iyagoo matalaya ilmahooda.*

Nidaamka dhagaysiga dhex dhexaadka ah waa in la dhamaystiraa, oo go'aan qoraal ah lasameeyaa, 30 cisho gudahood ka dib qabashada codsiga. (Dhexdhexaadinta, hadii la isku dayo, waa inay dhacdaa isla 30 maalmood gudohood.) Saraakiisha Dhageysiga dacwada ayaa la magaacabayaa si ay u fuliyaan dhageysiga dacwada.

Saraakiisha dhagaysiga waa inay lahaadaan aqoonta ku saabsan siinta Qaybta C iyo baahiyaha iyo adeegyada loo heli karo caruurta ku haboon iyo qoysaskooda oo la qabto waajibyadan soo socda:

- Dhagayso soo jeedinta macluumaadka la xidhiidha cabashada, baadhista dhamaan macluumaadka la xidhiidha arimaha oo ay eegaan inay gaadhaan xal mudaysan oo cabashada ah.
- Siinta diwaanka wadista kharashaadka gobolka, oo ay ku jiraan go'aano qoran.

Sida ku xusan Qaybta C, waxa lagu siiyay xuquuqaha hoos ku xusan nidaam dhagaysi kasta oo dhex dhexaadnimo ah oo lagu fuliyo nidaamyadan.

- Inuu ku weheliyo oo kaala taliyo la-taliye (kharashkaaga) iyo shakhsiyaad aqoon gaar ah leh ama tababar ku saabsan adeegyada daryeelka carruurta u-qalma sida ku cad Qaybta C (kharashkaagana).
- Si aad usoo jeediso cadaymo oo aad u waajahdo, su'aal waydiinta makhraatiga, iyo kuqasabka makhraatiyaasha xaadirka ah.
- Si aad u xanibto hordhaca cadayn kasta xiliga dhagaysiga taasoon kula xidhiidhin adiga ugu yaraan shan cisho ka hor intaan la dhaafin.
- Inaaad hesho hadal qoran ama elektaroonig ah (kalmad iyo kalmada) oo dhageysiga ah oo bilaash kuu ah.
- Si aad u heshid cadaymo qoran oo xaquuqada iyo go'aamada ah oo bilaash kuu ah.

Nidaamka dhageysiga ee aan dhana u janjeedhin ee lagu sharxay nidaamyadan waa in lagu fuliyaa wakhtiga iyo goobta adiga kugu haboon. Kama danbeyn karto 30 cisho taariikhda ka dib marka wakaalada gobolku hesho cabashada, nidaamka la qorsheeyey ee dhageysiga waa in la dhameystiraa oo la qoraa go'aanka waa in loo diraa dhinackasta. Sargaalka Dhageysiga dacwadu wuxuu damaanad qaadi karaa kordhin gaara wakhtiga ka danbeeya 30 cisho marka codsiga labada dhinac midkood. Dhinackastoo aan ku qanacsaneyn qaraarada iyo go'aamada nidaamka cadaalada ee dhageysiga dacwada wuxuu xaq u leeyahay inuu aado maxkamad dadweyne oo gobolka ama federaalka ah.

Inta lagu jiro wakhtiga (mudada wakhtiga) ee dhageysiga ku lugleh nidaamka cabashada, ilaa iyo bixiyaha adeega caruurta iyo hadii kale adigu aad ogolaatid, cunugaaga iyo qoyskaagu wuxuu sii wadi doonaa inuu helo adeegyada caruurta ee haboon ee lagu aqoonsaday IFSP oo aad ogolaatay.

Hadii cabashadu ku lugleedahay codsi adeegyo hore oo ku jira Qeybta C, cunugaaga iyo qoyskaaga waa in la siiyaa adeegyadaasi aan lagu muransaneyn.

Dhageysi **dhexdhexaada** waa nidaam caadi ah oo ay samaysay sarkaal dhex dhexaad ah oo waana doorasho qoysaska doonaya inay xaraystaan dacwad shaqsiga cunuga.

**Ku sahabsan Dhexdhexaadiyayaasha iyo Saraakiisha dhageysiga...**

Dhex dhexadiyasha iyo saraakiisha dhagaysiga waa inay noqdaan kuwo "dhexdhexaada." Dhageysi dhexdhexaada macnihiisu waa in qofka loo magacaabo inuu u adeego dhexdhexaadiye ama Sarkaal dhageysi ahaan.

1. Maaha shaqaale wakaalada gobolka, adeeg bixiye barbaarineed oo ku lugle bixinta adeegyada barbaarinta, adeegyada kale, ama daryeelka cunuga; iyo
2. Ma leh dano gaara ama shaqo oo khilaafaya dhexdhexaadnimadiisa hirgalinta dacwada.

   Qofka u qalma inuu noqdo Dhex dhexaadiye ama Sarkaal Dhagayste maaha shaqaalaha wakaalada hogaanka ee gobolka, bixiye adeegyada daryeelka caruurta aan ku taxaluqin maxaa yeelay qofka waxa bixinaya wakaalad ama barnaamij si uu u hirgaliyo dhex dhexaadinta ama siinta nidaamka dhagaysiga. Maamulka **cabashooyinku** waa inuu ku daraa bayaan in shuruuda Qeybta C la jabiyey iyo bayaan xaqiiqooyinka cabashadu ku saleysan tahay ah.

## Cabashooyinka Maamulka

Marka laga yimaado dhexdhexaadinta iyo dhageysiga dacwada ee sare lagu xusay, shakhsi ama urur ay ku jiraan kuwa ka socda gobol kale waxay qoran karaan cabasho qoran oo saxeeexab oo ka dhan ah wakaalad dawladeed ama adeeg bixiye gaara oo kasta, ooy ku jiraan adeeg bixiyaha adeegyada caruurta ee jabinaya shuruuda Qeybta C ee barnaamijka. Wakaalada gobolku waxay si balaadhan ugu faafisaa nidaamyada cabashooyinka gobolka waalidiinta iyo shakhsiyada kale ee daneeya, ooy ku jiraan xarumaha tababarka waalidiinta iyo macluumaadka, waakaladaha ilaalinta iyo u olaleynta, iyo haayada kale ee ku haboon.

Cabashada waa inay ku jiraan:

- Bayaan ay waakalada gobolka, wakaalad dawladeed, ama bixiye adeegy caruureed uu sida lagu eedeeyey jabiyey shuruuda Qeybta c.
- Xaqiiqooyinka bayaanku wuxuu ku saleysan yahay.
- Saxeexa iyo macluumaadka xiriirka qofka buuxinaaya cabashada.
- Hadii eedaymaha jabintu la xiriiraan canug gaara:
  - Magaca canuga iyo ciwaanka halka canugu degan yahay.
  - Magaca bixiyaha mashruuca adeega caruurta ee cunuga.
  - Sharaxaada nooca dhibaatada cunuga ooy ku jiraan xaqiiqooyin la xiriira dhibka.
  - Xalka la lasoo jeediyey ee dhibka ilaa heerka la ogyahay ee diyaarka ah wakhtiga cabashada la qoray. **Cabashooyinka maamulka waa inay qortaa oo ay ku heshaa wakaalada gobolku hal sano (1) gudaheed jabinta lagu eedeeyey.** Shakhsiga ama waakalada qortay dawacadu waa inay u gudbisaa nuqulka cabashada bixiyaha adeegyada caruurta isagoo u adeegaya canuga isla marka la qoro dacwada wakaalada gobolka.

Marka wakaalada gobolku hesho cabashada, waxay haystaa 60 cisho si ay:

- U fuliso baaritaan goobta ah, oo madax banaan, hadii wakaalada gobolku go'aamiso in baaritaanku daruuri yahay.
- Marka la tixgaliyo shakhsiga ama ururka dacwoonaya fursad lagu gudbiyo macluumaad dheeria, laba mid uun af ahaan ama qoraal ahaan, oo khuseeya eedaymaha cabashada.
- Sii wakaaladaha/bixiyayaasha fursad ay kaga jawaabaan dacwada, oo ay ku jiraan go'aanka wakaalada, iyo codsi ay ku xaliyaan cabashada iyo fursada in dhamaan dhinacyadu ku luglahaadaan dhexdhexaadinta.
- Dib u eeg dhamaan macluumaadka la xiriira oo samee go'aan madaxbanaan oo ah in ama inaanan la jabin shuruuda Qeybta C.
- Usoo saar go'aan qoran qofka dacwoonaya kasoo waxka qabanaya eedayn kasta oo dacwada ah kana kooban qaraarada xaqiiqooyinka iyo xalka iyo sidoo kale sababaha go'aanka kama danbeysta ah ee wakaalada gobolka.

Hadii go'aanka kama danbeysta ah tilmaamayo in adeegyada ku haboon aan la bixin, wakaalada gobolku waa inay wax ka qabataa:

- Ku guul daraysashada bixinta adeegyada ku haboon, oo ay ku jiraan talaabooyinka sixitaanka ee ku haboon wax ka qabashada baahiyaha cunugaaga oo ah arinka cabashada iyo qoyskaaga (sida adeeg magdhow ama lacag u celin); iyo
- Siin ku haboon adeegyada mustaqbalka ee dhamaan caruurta iyo socod baradka leh naafada iyo qoysaskooda.

Wakaalada gobolku waa inay ku dartaa dhageysiga dacwada hirgalinta go'aanka, hadii loo baahdo, oo ay ku jiraan hawlaha caawimada farsamo, wada xaajoodyada iyo talaabooyinka sixitaanka si loogu guulaysto u hogaansanaanta shuruucda.

Hadii cabasho qoran la helo oo sidoo kale ah arinta dacwada dhageysiga, ama ka kooban dhowr arimood, taaso mid ama in ka badan ay qeyb ka yihiin dhageysiga, wakaalada gobolku waa inay iska dhago tirtaa qeybkastoo cabashada oo wax lagaga qabtay dhageysiga dacwada ilaa iyo gunaanadka dhageysiga. Haseyeeshee, arinkastoo cabashada ah oo aan qeyb ka ahayn talaabada dhageysiga waa in lagu xaliyaa 60 cisho wakhtiga iyo nidaamka cabashada ee lagu sharxay dukumentigan.

Cabashooyinka mar horey lagu go'aamiyey nidaamka dhageysiga dacwada ee ku lugle dhinacyo isku mida laguma tixgalin doono dhageysigan. Wakaalada gobolku waa inay ogeysiisaa dacwoodaha in go'aanka dhageysigu uu qabanaayo.

Cabashada ku eedaynaysaa (qandaraaslaha ama bixiyaha adeegyada caruurta ee wakaalada dawlada ama adeeg bixiye gaara) inuu ku guul daraystay inuu hirgaliyo go'aanka dhageysiga waa inay xalisaa wakaalada gobolku.

## Waalidiinta u Dhala Caruurta Kuwa aan Dhalin

*Yaa ilaaliya xuquuqda caruurta bilaa waalidka ama masuul sharci ah?*

Xuquuqda caruurta ku haboon Qeybta C waa la ilaaliyey hadii:

- Waalidna lama aqoonsan karo;
- Bixiyaha adeegyada caruurta, ka dib dadaalo macquula, ma heli karo waalid; ama
- Cunuga waxa ilaaliya Gobolka Washington ee shuruucda gobolka.

Shakhsi ayaa loo igmadaa inuu ugu dhaqmo "waalid matale ahaan" ahaan waalidka dacwada ku xigta.

Dhageysiyada dacwadahan waxa ku jira habka go'aaminta in canugu u baahan yahay waalid u dhala waalid kale ilmo iyo sameynta dadaal macquula si loogu igmado canuga waalidkaasi in aan ka badneyn 30 cisho ka dib go'aaminta in canugu u baahan yahay waalid aan ahayn kiisa dhabta ah.

Shuruudahan soo socdaa ayaa la isticmaalaa marka la dooranaayo waalidka aan dhabta ahayn. Waalidiinta aan dhabta ahayn waxa soo doorta bixiye adeeg caruurteed oo kasta waana inuu buuxiyaa shuruudahan soo socda:

- Aanu ka lahayn dano shakhsi ama xirfadeed oo ka hor imaanaya danaha cunuga uu mataalayo.
- Uu leeyahay aqoon iyo xirfado hubinaaya matalaad ku haboon cunuga.
- Aanu ahayn shaqaale wakaalad gobol; ama shaqaale qof bixinaya adeegyada caruurta, waxbarashada, daryeel, ama adeegyada kale ee cunuga ama xubin qoyska cunuga ah. Qof hadii kale ku haboon inuu noqdo waalidka matalaha ah ee nidaamyadan maaha shaqaale kaliya maxaa yeelay waxa lacag siiya bixiye adeeg caruureed si uu ugu adeego waalid matale ah ahaan.

Marka cunuga uu ilaalinaayo gobolka Washington ama ku jiro daryeel caruureed, wakaalada bixisa adeegyada caruurtu waa inay kala tashataa wakaalada dawlada ee loo igmaday daryeelka cunuga.

Canug uu gobolku ilaaliyo, halkii ay ka magaacabi lahaa wakaalad bixisa adeeg caruureed, xaakim la socda kiisa cunuga ayaa magacaabi kara waalidka matalaha ah ilaa iyo inta doorashadu buuxinayso shuurada lagu xusay sare.

Waalidka matalaha ah wuxuu leeyahay xuquuq la mida waalidka kale dhamaan ujeedooyinka Qeybta C.



## Macluumaadka Xiriirka

Hadii aad u baahan tahay macluumaadka khuseeya nidaamka badbaadada, kala xiriir Iskuduwaha Khayrkaadka Qoyska Deegaanka (FRC):

Ama

Hadii aad qorshaynaysid dacwad, codsi dhexdhexaadin iyo/ama nidaam dhageysi dacwad, fadlan kala xiriir barnaamijka ESIT:

**Washington State Department of Children; Youth & Families (Waaxda Carruurta ee Gobolka Washington, Dhalinyarada iyo Qoysaska) Early Support for Infants and Toddlers (Caawimada Hore ee Cunugyada yar-yar iyo Socod Baradka, ESIT) Barnaamij**
PO Box 40970
Olympia, Washington 98504-0970
**esit@dcyf.wa.gov**
**www.dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit**

Khayraadka:

**Washington PAVE (Partnerships for Action, Voices for Empowerment (Shuraakada Talaabooyinka, Codadka Xoojinta))**
6316 S. 12th St.
Tacoma, Washington 98465
Tilifoonka: 1-800-572-7368
FAX: 253-566-8052
**pave@wapave.org**
**www.wapave.org**

*Takoorku waa ka mamnuuc dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha. Qofna lagama saari karo iyadoo loo eegayo isir, midab, diin, caqiido, asal halka uu kasoo jeedo, lab iyo dhedig, da' ama naafanimo.*

*Hadii aad jeclaan lahayd nuqulka dukumentigan oo qaab ama luuqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Constituent Relations (Xiriirka Gobolka) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION FS_0005 | DEL 11-001 SM (07-2023) Somali